FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـدة الرسميـة

Sannadka 15aad Muqdisho, 2da Maajo 1987 Lam. 5

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 10 ee 14 Maarso 1987, Beddelaad iyo Magacaabid Saraakiil. BOG, 267

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 11 ee 26 Feb. 1987, Ciqaab Asluubeed. » 268

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 12 ee 3 Jen. 1987, Magacaabid Xeer Ilaaliye M.B.D. » 269

XEER WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA L. 9 ee 23 Feb. 1987, Aqoonsi Ururka Samafalka Gargaare. » 270

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH·

QAYBTA SADDEXAAD

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, GOBOLKA SH. HOOSE. SHALAMBOOD, 25.4.87, Naado Dhul J.le Maxamuud Axmed Faarax iyo Axmed Jaamac Cali L. 97/Bis » 271

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 14.4.87, Lumid Jeeg War. L. 0429204 ku qoran Cadceed Xaashi Shuuriye L. 98 » 272

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 5.4.87, Lumid Jeeg War. L. 0286261 ku qoran Xaaji Xasan Yaxye L. 99 » 273

MAXKAMADDA G. SANAAG, 26.3.87, Lumid Jeeg War. L. 0181535 ku qoran Axmed Cablaahi Ibraahim L. 100

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 4.4.87, Lumid Buug Kayd L. 510 ku qoran Burhiin Axmed Nuur L. 101 » 274

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 2.4.87, Lumid 5 Jeeg War. ku qoran Cabdi Yuusuf Caduur L. 102 » 275

WARSHADDA BLASTIKADA IYO ALLMINYADA XAMAR; Ogeysiis isugu yeerid shr caadi ah Saamley L. 102/bis » 276

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, GOBOLKA SH/HOOSE SHALAMBOOD, 22.4.87 Naado Dhul, J.le Sheekh Cabdi Maxamuud » 278

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, GOBOLKA SH/HOOSE SHALAMBOOD, 22.4.87 Naado Dhul, Jle Cabdi Xasan Axmed » 279

QAYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 10 ee 3 Jen. 1987, Beddelaad iyo magacaabid Saraakiil.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. yahay 3, soona baxay 10kii Jannaayo 1979kii, kuna saabsan dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka, iyo wixii beddelaad ku dhacay;

MARKUU TIXGELIYEY: Tala soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka tirsigeedu yahay 114/MD1/87 ee 7.3.1987;

WUXUU GO'AAMIYEY

Xeerka Soo Socda:-

Qod. 1aad

Jaalle Dhamme Cabdikariin Qalinle Kaahin, oo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Garsoorana ka ah MB Gobolka W/Galbeed, waxaa loo magacaabay Guddoomiyaha MB Gobolka W/Galbeed ee Hargaysa.

Jaalle G/Dhexe. Cabdulle Cali Calasoow, oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, waxaa loo magacaabay Garsoore MBD ee Xamar;

G/le Cabdullaahi Cabdi Xasan, oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, waxaa loo magacaabay Ku-Xigeenka Xeer-Ilaaliyaha Guud ee MBD ee Xamar.

Qod. 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee dawladda.

Muqdisho, 14 Mar. 1987

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 3 Bogga lamb. 32
Muqdisho 22 Mar. 1987
Hantidhawraha Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Calli

MADAXWEYNAHA JDS
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA J,D,S, L, 11 ee 26 Feb, 1987
Ciqaab Asluubeed:

MADAXWEYNAHA J,D,S,

MARKUU ARKAY: Qod, 82aad ee Dastuurka J,D,S,

MARKUU ARKAY: Qod, 45aad Qeybtiisa 1aad xarafkiisa (t) ee sharciga shaqaalaha dawladda lam, 5 ee 2,2,80,

MARKUU TIXGELIYEY: Go'aanka Guddiga Arrimaha Shaqada iyo Shaqaalaha MBD, oo ku taariikhaysan 12,2,87 iyo talo soo jeedinta Guddoomiyaha MBD ee ku xusan warqadda lambar 139/MD1/87,

WUXUU GO'AAMIYAY

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Kaaliye Maxamuud Xasan Ciid oo ka tirsan shaqaalaha MBD, waxaa la ganaaxay e7 (todoba) beri mushaarkood oo laga jarayo bisha Maarso 1987, sida uu qabo qod, 45aad qey btiisa 1aad xarafkiisa (t) ee sharci lam, 5 ee 2,2,80 sababtoo ah in uu si aan sharciga waafaqsaneyn u bixiyay Dukumin ti muhim ah taasoo xad-gudub ku ah qod, 24aad iyo qod, 25aad ee isla sharciga shaqaalaha dowladda lam, 5 ee 2,2,80 sida ku cad go'aanka guddiga arrimaha shaqada & Shaqaalaha MBD iyo warbixinta guddoomiyaha MBD lam, yahay 139/MD1/87 ee 15,2,87,

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha J,D,S, Waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda,

Waan Aragnay ee Diiwaan Gelinay,
Diiwaanka L, 1 Bog, L, 36
Muqdisho, 26,2,87,
Hantidhowraha Guud,
Dr, Xuseen Cabdulle Calli,

Muqdisho, 7vzB
MADAXWEYNAHA J,D,S,
Maxamed Siyaad Barre

XEER MADAXWEYNAHA J,D,S, Lam, 12 Taariikh 3 Jen, 1987 Magacaabid Xeer Ilaaliye Maxkamadda Badbaada da Dalka,

MADAXWEYNAHA J,D,S,

MARKUU ARKAY: Qod, 82aad ee Dastuurka J,D,S,

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 49 ee 23ka Disember 1984, kuna saabsan wax ka beddelidda Das/ka,

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam, 3 ee 30ka Jennaayo 1970 iyo beddelaadyadii ka dambeeyay, kuna saabsan dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo Xeer Ilaalinteeda,

MARKUU TIXGELIYEY: Baahida loo qabo in si ku meelgaar ah loo magacaabo Xeer Ilaaliye u qaabilsan Maxkamadda Badbaadada Dalka dambiyada Lidka ku ah Qarannimada Soomaaliyeed,

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

G/Sare Dr, Cusmaan Maye Macallim waxaa loo magacaabay Xeer Ilaaliye Guud oo u qaabilsan Maxkamadda Badbaadada Dalka oogista dacwadaha ciqaabta ee dembiyada Lidka ku ah jiritaanka, midnimada, madaxbannaanida & nabadgelyada gudaha iyo dibedda ee Qarannka Soomaaliyed,

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynuhu waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda,

Muqdisho, 3 Jan, 1987.

Waan Aragnay ee Diiwaan Gelinay,
Diiwaanka L, 1 Bog, L, 37
Muqdisho, 26 Maajo 1987,
Hantidhowraha Guud,
Dr, Xuseen Cabdulle Cali,

MADAXWEYNAHA J,D,S,
Maxamed Siyaad Barre

XEER WASAARADDA ARR, GUDAHA L, 9 ee 23;2,87 Aqoon si Ururka Samafalka Gargaarka,

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J,D,S,

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lr, 30 ee 30,7,84 ee lagu dhisay Wasaaradda Arrimaha Gudaha,

ISAGOO ARKAY: Qod, 54/2 ee Xeerka Madaniga Soomaali yeed Lr, 37 ee 2,6,1973,

ISAGOO ARKAY: Xeerka lagu dhisay Ururka Samafalka (GARGAARA),

ISAGOO TIXGELIYEY: Inay lagama maarmaan tahay Abuurista Ururada noocani ah,

WUXUU XEERIYAY

Qodobka 1aad

Waxaa si rasmi ahaan loo aqoonsaday Ururka (GARGAARA) oo ah Urur Samafal, ujeedadiisuna tahay kordhinta awoodda iyo isku filnaasho beelaha, shaqo siinta horumarinta, guriyenta, caafimaadka bulshada, beeraha, horumarinta kheyraadka maxaliga, waxbarashada iyo adeegga Bulshada.

Qodobka 2aad

Ururka wuxuu xaruntiisu noqonaysaa magaalada Muq.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu soo saxiixo Wasiirka Arrimaha Gudaha, waxaana lagu soo saarayaa Faa finta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 23,2,1987,

WASIIRKA ARRIMAHA GUDAHA
S/Guuto Axmed Suleymaan Cabdalla,

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEY, IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA
GOBOLKA SH.HOOSE SHALAMBOOD

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jle Maxamuud Axmed Faatax iyo Axmed Jaamac Cali ay ku soo weydiisteen Arji taariikhdiisu tahay 15.4.87 gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal deg/ mada Afgooye qaabkiisuna yahay Trapezio Rettangolo Addimidisuna yihiin m. 256; 222; 233; 4/1 120 kuna tadiyaa 40.000 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Sheekh Abuukar

Koofur waxaa ka xiga: Waddo Jaay ah

Galbeed waxaa ka xiga: Xasan Hiloowle

B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii dooneysa dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud Gobolka Shabeelaha Hoose, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) soddon maalmood oo laga billaabahayo maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmgia ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dowladda Hoose Waaxda farsamada dhulka.

Shalambood, 25.4.1987

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA DEG. MAG.
(Saciid Xirsi Nuux)

L. 97/bis

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cadceed Xaashi Shuuriye,

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War, Lam, 0429204 kuna jirto lacag dhan sh,so, 48,000 kuna qoran magaca J/le Cadceed Xaashi Shuuriye sida ku cad warqadda lam, 9589 ee Tr, 14,4,87 ka baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Qeybta X, Guud,

HADDUU ARKAY: Qod, 69 Sharciga Lam, 2 ee Tr, 9,9,62dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Wareega Lam, 0429204 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta W/dhiiglay kuna jirto lacag dhan sh,so, 48,000 kuna qoran magaca J/le Cadceed Xaashi Shuuriye

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta W/dhiiglay in ay siiso J/le Cadceed Xaashi Shuuriye lacagta caddadeedu tahay, sh,so, 48,000 oo ah beddelkii J/War, kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J,D,S, Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin,

Muqdisho, 14,4,87,

GUDDOOMIYAYAHA MAXKAMADDA GOB, BANAADIR,
Dr, Cabdi Salaad Shongole

L, 98

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Xaaji Xasan Yaxye,

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War, Lr, 0286261 kuna jirto lacag dhan sh,so, 48000 kuna qoran magaca J/le Culjmo Saleymaan Cali sida ku cad warqadda Lr, 3475 ee Tr, 5,4,87 ka baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta labaad,

HADDUU ARKAY: Qod, 69 Sharciga Lam, 2 ee Tr, 9,9,62dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeega Wareega Lam, 0286261 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soo maaliyeed laanta 2aad kuna jirto lacag dhan sh,so, 48,000 kuna qoran magaca J/le Culimo Saleymaan Cali,

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Labaad in ay siiso J/le Xaaji Xasan Yaxye lacagta caddadee du tahay sh,so, 48,000 oo ah beddelkii J/War, kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareyn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka iagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J,D,S, Haddii inta ka horeyso wax ishortaag ah aan laga keenin,

Muqdisho, 5,4,87,

GUDDOOMIYAYAHA MAXKAMADDA GOB, BANAADIR,
Dr, Cabdi Salaad Shongole

L, 99

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG
UJEEDDO: BEDELAAD J/W, Lr, 0181535,

HADDUU ARKAY: Codsiga ku taariikheysan 26,3,87 ee uu Maxkamadaan u soo qortay J/le Axmed Cabdulaahi Ibraahim isagoo kaga codsaday Maxkamadda codsigii saas in loo baafiyo Jeeg ka lumay,

HADDUU ARKAY: Waxa uu ku saabsan yahay codsigasi,

HADDUU ARKAY: Ogeysiiska Bankiga Ganacsiga iyo keydka Somaaliyeed laanta Cergaabo sida ku cad xaa shida SUM, 000907 ee 24,3,87 taasoo ay ku cadahay inuu lumay J/War, Lr, 0181535 kuna qornayd lacag dhan sh,so, 40,000 oo magaca Axmed C/lahi Ibraahim lagana baafiyay B,G,K,S, Laanta Hargeysa,

HADDUU ARKAY: Qod, 69 D,L, 9,9,65 N/2 Lumid J/War, Lam, 0181535 ee ay ku qoran tahay lacag dhan sh,so, 40,000 oo magaca J/le Axmed C/laahi Ibraahim,

WUXUU AMRAYAA

In la cusbiinaysiiyo J/War, ee lambarkiisu yahay, 0181535 ka dib markii ay ka soo wareegto muddo dhan Sodon Beri gudahood marka go'aanka lagu shaaciyo Faa finta Rasmiga ah ee Dawladda,

WAXAA LA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la sameyndoono gacanta laga saaro J/le Axmed C/laahi Ibraahim ama qof wakaalad sharci ah ka sita, iyadoo la sugayo mudada kor ku sheegan.
Gudoomiyaha Maxkamadda Gobolka Sanaag C/gaabo,

Dr, Cabdi Raxmaan Sh, Maxamed

L, 100

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Burhaan Axmed Nuur,

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay B/Keyd Lam, 510 kuna jirto lacag dhan sh,so, 5,649,66 kuna qoran magaca J/le Burhaan Axmed Nuur sida ku cad warqadda Lam, 510 ee Tr, 29,3,87 ka baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Afaraad,

HADDUU ARKAY: Qod, 69 Sharciga Lam, 2 ee Tr, 9,9,62dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) B/Keyd Lambar 510 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta 4aad kuna jirto lacag dhan sh,so, 5,649,66 kuna qoran magaca J/le Burhaan Axmed Nuur,

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed laanta Afaraad in ay siiso J/le Burhaan Axmed Nuur lacagta cadda deedu tahay sh,so, 5,649,66 oo ah beddelkii B/Keyd kor ku xusan markay ka soo wareegato muddo aan ka yareyn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J,D,S, Haddii inta ka horaysa wax ishortaag ah aan laga keenin,

Muqdisho, 4,4,87,

GUDDOOMIYAYAHA MAXKAMADDA GOB, BANAADIR,
Dr, Cabdi Salaad Shongole

L, 101

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Cabdi Yuusuf Cadduur;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 5 Jeeg War. oo Lambar. kala yihiin 0522602-0522603-0255271-0522598-0522597 kuna kala jirto lacag dhan midkiiba afar Jeeg min Sh. So. 100.000/= iyo mid Sh.So. 50.000/= isugeyn Sh.So. 450.000/ kuna qoran magaca J.le Cabdi Yuusuf Cadduur sida ku cad warqadda Lam. 9111 ee Tr. 31.3.87 ka baxday Bangiga Ganac siga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Qeqbta Xis-Guud;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1962dii

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) shanta (5) Jeeg War. Lr. 0522602-0522603-0255271-0522598-0522597 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarun ta kuna jirto dhammaantood lacag dhan Sh.So. 450.000/= kuna qoran magaca J.le Cabdi Yuusuf Cadduur.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Cabdi Yuusuf Cadduur lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 450.000/= oo ah beddelkii Jeegagga War. ee kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood, laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JLS, haddii inta ka horeysa wax ishortaag ah aan ka imaan ama la keenin.

Muqdisho, 2.4.1987

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdi Salaad Shongole)

L. 102

WARSHADDA BLASTIKADA IYO ALLUMINYADA XAMAR

O G E Y S I I S

ISUGUYEERID SHIR CAADI AH SAAMILEY

Dhammaan Saamileyda Shirkadda Warshadda Blastikada iyo Alluminyada Xamar waxaa la ogeysiinayaa in lagu qabandoono xarunta Shirkadda ee Xamar shir caadi ah ee sannadeedkii 1986—1987 maalinta taariikhdu tahay 15.5.87 saacaddu markey tahay 8:30 fiidnimo.

Haddii uu suuroobi waayo shirkaas waxaa dib loo qabandoonaa maalinta ay taariikhdu tahay 20.5.87 isla saacaddaas 8:30 fiidnimo.

Dooda shirku waxay ku saabsan tahay:

1. Ansixinta xisaab xirkii 1986

2. Doorashada Guddiga Maamulka ee seddaxda sano ee soo socota

3. IWM.

Waxaa dhammaan saamileyda laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor taariikhda shirka ay soo dhigaan xarunta shirkadda saamiyadooda.

MAAMULAHA IDMAN

L. 103/bis

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA

GOBOLKA SH/HOOSE SHALAMBODO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeysiinayaa in Sheekh Cabdi Maxamuud Gureyle uu ku soo weydiistay arji taariikhdiisu tahay 6.3.87; Gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal degmada Shalambood qaabkiisuna yahay 24,70= Rettangolare addimihiisuna yihiin m. 14,70,14.70;24;70; kuna fadhiya 363,09; Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Xasan Ciid

B a r i waxaa ka xiga: Cusmaan Cali

Qofkii dooneysa dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaraddda Hawlaha Guud Gobolka Shabeelaha Hoose, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) soddon maalmood oo laga bilaabayo maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dowladda Hoose ee Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 22.4.1987

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA DEG.MAG.
(Saciid Xirsi Nuux)

WASAARADDA HAWLAHA GUUD IYO GURIYEYNTA

GOBOLKA SH/HOOSE SHALAMBODO

N A A D O D H U L

Waxaa la caddeynayaa in J.le Cabdi Xasan Axmed iyo Cusmaan Calasow Dhiblaawe ay ku soo weydiisteen arji taariikhdiisu tahay 20.2.1987 Gabal dhul dowladeed ah oo ku yaal degmada Shalambood qaabkiisuna yahay Afar Gees le (Quadarato) 20,20,20,20, addimihiisuna yihiin 200,200 kuna fadhiya 400,00 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Beero dadweyne

Koofur waxaa ka xiga: Beeri dadweyne

Galbeed waxaa ka xiga: Guriga Xaaji Ismaaciil

B a r i waxaa ka xiga: Jidka Xamar/Shalambood

Qofkii dooneysa dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaraddda Hawlaha Guud Gobolka Shabeelaha Hoose, waxaana laga doodi karaa muddo ku siman (30) soddon maalmood oo laga bilaabo maalinta la soo daabaco Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Laguna soo dhejiyo ogeysiisyada Dowladda Hoose ee Waaxda Farsamada Dhulka.

Shalambood, 22.4.1987

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA DEG.MAG.
(Saciid Xirsi Nuux)

MAXKAMADDA GOBOLKA TOGDHEER BURCO

MGT/9/86 Tr. 9.12.86

UJEEDDO: Baafin Jeegga Wareega Lr. 0567092 ee Tr. tahay 7.10.86;

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO

MARKUU ARKAY: Dacwadda ku saabsan Baafinta Jeegga Wareega ee Lumay;

MARKUU ARKAY: Ogaysiinta Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco;

MARKUU ARKAY: Qod. 69-D-L. (9.9.65, Lumid Jeegga Wareega ee Lam. yahay 0567092, Tr. 7.10.86, ee ku qoran yahay J.le Maxamed Cali Diiriye, kuna qorayd Lacag dhan 100.000/= Sh.So. Boqol kun oo Shilin keli ah.

WUXUU GO'AAMIYEY

In loo Cusbooneysiiyo Jeegga Wareega ee kor ku xusan, J.le Maxamed Cali Diiriye, ka dib marka ay ka soo wareegto muddo dhan 20 casho, laguna Sharciyeeyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeeggagaas cusub ee la samayn doono in gacanta laga saaro J.le Xuseen Daa'uud Cigaal, iyadoo la sugaayo muddada kor ku xusan.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO
(Dr. Abokor Islaw Cumar)

KAALIYAHA MAXKAMADDA G/TOGDHEER BURCO
(X. X. Sugule)